



Tilmaamaha Baaritaanka Degdegga ah ee Antigenka COVID-19 ee Isticmaalka

Tallaabada 1 : Diyaarso Agabka

Step 1: Prepare Material

Waxaa laga yaabaa inaad ku haysato xirmada Isku hagaajinta Baaritaanka 1 ama Isku hagaajinta Baaritaanka 2. Fadlan raac tillabooyinka saxda ah ee ku saleysan xirmada gaarka ah ee aad heshay.

ISKU HAGAAJINTA BAARITAANKA 1:

Fur xirmada, ka soo bixi boorsada kaarka baaritaanka ee COVID-19, Tuyuubka waxaa horay ugu jira milanka soo saarista iyo suuf. Marka aad diyaar u tahay inaad sii waddo baritaanka, fur boorsada xaashida ah ee Kaarka Baaritaanka Covid-19.



1 COVID-19 Test Card
in Pouch



1 Empty Tube and
1 Sealed Solution



1 Swab

ISKU HAGAAJINTA BAARITAANKA 2:

Fur xirmada, ka soo bixi boorsda kaarka baaritaanka COVID-19, Tuyuub maran, Milanka xiran, iyo suuf. Marka aad diyaar u tahay inaad sii waddo baaritaanka, fur boorsada xaashida ah ee Kaarka Baaritaanka COVID-19.



1 COVID-19 Test Card
in Pouch



1 Pre Filled Tube



1 Swab

Tallaabada 2: Uruurinta Muunada

Step 2: Collect Sample

A. Ka saar suufka xirmada, ka taxaddar inaadan taaban caarada suufka. Fadlan u hayso baakadda suufka si hadhow u isticmaasho.



B. Si tartiib ah u geli dhammaan caarada nuugista ee suufka (badanaa $\frac{1}{2}$ ilaa $\frac{3}{4}$ inch) oo geli sankaaga.



C. Si adag oo tartiib tartiib ah ugu wareeji geesaha sanka si wareeg ah oo ka dhan ah gidaarka sanka ugu yaraan 5 jeer. Qaado ugu yaraan 15 ilbiriqsi si aad u ururiso muunada oo hubi inaad ku ururiso suufka wax kasta oo dheecaan oo ka yimaada sanka. Adigoo isticmaalaya isla suufka, ku soo celi habka muunad ururinta sanka kale. Hubi inaad ku tirtirto LABADA duleel ee sanka SUUF ISKU MIDA.



Tallaabada 3: Habka Muunada

Step 3: Process Sample

A. Tuubada si toosan ugu taabo miiska oo marooji furka liimiga ah ee weyn si aad u furto tuubada.

B. Geli suufka tuubada, ku taabo salka hoose ee tuubada caarada suufka, oo walaaq ugu yaraan 15 jeer.




A



B

C. Tuuji dhinacyada tuubada si aad u soosaarto dareeraha ugu badan ee suurtogalka ah suufka ka dibna ka saar suufka.

D. Dib ugu celi furka liimiga ah ee weyn, ku celi suufka xirmada. Si badqab leh u tuur suufka iyo xirmada.



C




D



Tallaabada 4: Ku dar muunad

Step 4: Add Sample

Marooji si aad u furto furka cad ee yar ee tuubada. Ku dar 3 dhibcood oo muunad ah Afka muunad qaadaha ee Kaarka Baarintaanka COVID-19. Dib ugu xir furka yar ee cad.



Tallaabada 5: Sug 15 daqiiqo

Step 5: Wait 15 minutes


Ku bilow wakhtiga adigoo gujinaya badhanka "Start Timer" ee App-ka, isla markaaba ka dib markaad muunada ku darto Afka muunad qaadaha. Natijjadu waxay ku diyaar noqon doontaa 15 daqiiqo gudahood.



Tallaabada 6: Akhri natijjada

Step 6: Read Results

Natijjooyinka waa in aysan diyaar noqon 30 daqiiqo ka dib (Natijjooyinka waxaa lagu muujiyey weyneysta 2X).



Tallaabada 7: Sharaxaada natijjooyinka Baaritaanka

Step 7: Test Result Explanation

Natijjada tagan:

Natijjada tagan waa in ay muujisaa LABADA Xariiqda C (BAABAL KHAIFIIF AH) iyo xariiqda T ah (BAABAL MADOW AH). Natijjada tagan waxay ka dhigan tahay in antigen-ka fayraska COVID-19ka la ogaaday shaqsiguna uu qabo COVID-19ka. Dadka laga helay waa in ay is karantiilaan oo ay raadsadaan daryeel ayna la socodaan dhakhtarkooda ama bixiyaha xanaanada caafimaadka maadaama baaritaan dheeri ah iyo warbixinta caafimaadka dadweynaha ay lagama maarmaan noqon karto.

Positive Result



Negative Result



Natijjada Taban:

Natijjada taban waxay tusi doontaa KALIYA C (BAABAL KHAIFIIF AH) .

Natijjada taban waxay ka dhigan tahay in antigens-ka fayraska ee COVID-19 aan la helin iyo in qofka loo maleeyo inuusan qabin COVID-19.

- Fadlan ogow in natijjadaa taban aysan meesha ka saarayn COVID-19
- Haddii ay dhacdo natijjada baaritaanka taban: Sii wad raacitaanka dhammaan kala fogaansha bulshada, talooyinka oo qaado tillaaboooin ilaalin ah. Haddii tuhunka caabuqa uu sii jiro iyo/ama baaritaankaagii ugu horreeyay uu kawaayid yahay, ku celi baaritaanka 1-2 maalmood ka dib oo la tasho bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga ama xarunta COVID-19 ee deegaanka.

Tallaabada 8: Tuur Qalabka Baaritaanka

Step 8: Dispose of Test Kit

Kadib marka baaritaanka la dhammeeyo, ku tuur qaybaha qalabka qashinka



Translated by Alaska CSS Refugee Assistance & Immigration Services
Formatted by Alaska Literacy Program



See more at
AnchoragePLNs.org



SCAN ME



This project was partially supported by a grant awarded by the Municipality of Anchorage, Anchorage Health Department. The opinions, findings, conclusions or recommendations expressed in this publication are those of the author and do not necessarily reflect the views of the Municipality of Anchorage, Anchorage Health Department.

